


Qodobbada Muhiimka ah

# Soo Koobitaanka Kulamada Dhagaysiga ee Qoyska

*Julaay 2022*

## Dulmar Guud

Talaabada koowaad ee mashruuca "Hubinta Xilliga Kala-wareegga Waxbarashada Hore" si dib loogu habeeyo Qiimaynta Xadaanada ee Oregon (OKA), Waaxda Waxbarashada Oregon (ODE) iyo Qaybta Waxbarashada Hore ee Oregon ELD) waxay ka wada shaqeeyeen inay sameeyaan waraysi qoys. Ugu dambayntii, ODE iyo ELD waxay rabeen in waraysigan la qaado sannad walba oo ay u qabtaan barayaasha xadaanada carruurta qoysaska gelaya fasallada dayr kasta.

Ujeedada waraysiyadu waa: 1) in la siiyo Qaybta Waxbarashada Hore (ELD)  macluumaadka ku saabsan waayo-aragnimada waxbarashada hore ee qoysaska, iyo 2) si kor loogu qaado xiriirka ka dhexeeya barayaasha, carruurta, iyo qoysaska. Waraysigani waa hal agab oo ka kooban agab cusub oo ODE, ELD, iyo Guddiga La-talinta mashruuca ay ka shaqaynayaan sidii ay qayb uga noqon lahaayeen [Mashruuca Hubinta Xilliga Kala-guurka Waxbarashada Hore](#).

Bishii Meey iyo Juun 2022, shaqaalaha ODE iyo ELD waxay qabteen Kulamo Dhagaysi Qoys ah oo ay la yeesheen tiro kooban oo qoysas ah si ay u helaan jawaab celin bilow ah oo ku saabsan su'aalaha iyo habka waraysiga (*eeg dukumentiyada ku jira Lifaaqa A*). Ujeeddada kulamadan dhagaysiga qoyska waxay ahayd in la weydiiyo qoysaska haddii su'aalaha la sameeyay ay yihiin kuwo cad oo macno leh, haddii hannaanku uu yahay mid soo dhaweyn leh oo si sahlan loo qaban karo, iyo haddii ay ku talin lahaayeen wax ka beddel si kor loogu qaado su'aalaha ama waayo-aragnimada. Bishii Juun 2022, ODE iyo shaqaalaha ELD waxay sidoo kale kala tashadeen waraysiga qoyska Guddiga La-talinta Mashruuca. Guddiga La-talinta waxaa ka mid ah barayaasha hore, barayaasha xadaanada carruurta, ishkaashatada nidaamka waxbarashada hore, iyo cilmi baarayaal. ODE iyo ELD waxay dibu eegis ku samaynayaan naqshada waraysiga qoyska iyadoo lagu salaynayo ra’yi-celinta kulamada dhagaysiga qoyska iyo guddiga la talinta. Nooca dib loo eegay ayaa la isticmaali doonaa inta lagu jiro Tijaabada Dayrta 2022 si loogu tijaabiyo agabka cusub oo ay la socdaan tirada badan ee barayaasha xadaanada iyo qoysaska.

## Qoysaska ka-qaybgalaya

ODE iyo ELD waxay mudnaan siiyeen martiqaadka waalidiinta, mas'uuliyiinta, iyo daryeelayaasha aasaasiga ah ee ka socda bulshooyinka jinsiyad ahaan, qowmiyad ahaan, luqad ahaan, iyo dhaqan ahaanba la takooray nidaamka waxbarashada Oregon si ay uga qaybgalaan Kulamada Dhagaysiga Qoyska. Dhexdhexaadinta iyo sare u qaadida codadka qoysaska bulshooyinkan waa hab loogu talogalay oo lagu horumarinayo sinnaanta jinsiyadaha taas oo qayb ka ah habkan dibu-qaabaynta.

Dedaallada wacyigelinta iyo qorista ayaa sidoo kale ujeedadoodu ahayd in lagu daro qoysaska ka kala yimid gobollada kala duwan ee Oregon. Wadar ahaan lix kulan oo dhagaysi ah ayaa la qabtay: saddex Ingiriisi ah, mid Isbaanish ah, mid Isbaanish ah oo leh turjubaan, iyo mid Ruush ah. Lixda kulan oo dhan, wadar ahaan lix waalid/daryeelayaal ayaa ka qaybqaatay1[1]. Ka-qaybgalayaashu waxay heleen kaadhadhka hadyada ee Bartilmaameedsan oo dhan $25 si looga mahadceliyo wakhtigooda iyo ra'yi-celinta kulanadan dhagaysiga ah.

Maadaama kulanada dhagaysiga la qabtay xilligii gu'ga, barayaasha xadaanadu may awoodin inay waraystaan carruurta iyo waalidiintooda/daryeelayaashooda markay gelayaan sannad-dugsiyeedka. Sidaa darteed, ka qaybgalayaasha casharrada dhagaysiga waxa ka mid ahaa qoysas leh carruur weli ku jiray goobaha waxbarashada hore iyo carruur hore ugu jirtay xadaanada. Waraysiyada waxaa sidoo kale qaaday dad kala duwan, oo ay ku jiraan barayaasha dugsiga barbaarinta, Gudiyada La-talinta, ELD ama xubnaha shaqaalaha ee ODE.

---

## Aragtida Qoyska ee Waraysiga Qoyska

Dhammaan waalidiinta/daryeelayaasha ku jira kulanada dhagaysiga waxay dhammaystireen waraysiga qoyska, badankooduna waxay si fiican uga jawaabeen su'aalaha waraysiga. Kala bar qoysaska ayaa sheegay in ay aaminsan yihiin inay la wadaagi lahaayeen macluumaad la mid ah ama ka badan haddii ay la dhammaystiri lahaayeen waraysiga xilligii dayrta barayaasha xadaanada carruurtooda. Mid ka mid ah ka qaybgalayaasha ayaa sheegay in waraysigu ahaa wada-sheekeysi uuna oggolaaday inay si furan wax u wadaagaan. Ka qaybgale kale ayaa si gaar ah u jeclaystay sida su'aaluhu u ahaayeen kuwa ku kooban qoyska.

### Soo-jeedinta loogu talogalay Horumarinta

Waalidiinta/daryeelayaasha ka-qaybqaatay waxay sameeyeen talooyin badan oo lagu horumarinayo habka waraysiga iyo su'aalaha waraysiga labadaba. Faallooyinkoodu waxa ay si weyn u waafaqsanaayeen ra'yi-celinta ay bixiyeen Guddiga La-talinta mashruuca. Soo-koobida ra'yi-celinta qoyska iyo guddiga la-talinta ayaa hoos lagu bixiyay:

***Dibu eegidda hannaanka*.**

Dhawr qoys iyo guddi la-taliyayaal ah ayaa ku taliyay in su'aalaha lala wadaago qoysaska kahor

---

[1]Shan waalid/daryeel bixiye oo dheeraad ah ayaa ka qaybqaatay koox-kooxeed. Si kastaba ha ahaatee, si toos ah uma aysan dhaqmin ama dib u eegin su'aalaha iyo habka wareysiga qoyska, sidaas darteed jawaabahooda iyo falcelintooda kuma jiraan koobantan.

waraysiyada, si waalidiinta/daryeellayaashu ay u helaan wakhti ay kaga fikiraan jawaabaha kahor inta aysan kala hadlin barayaasha xadaanada. Qoysaska qaar ayaa sidoo kale waydiiyay su'aalaha loo baahan yahay iyo haddii barayaasha, dugsiyada, iyo/ama degmooyinka ay wax ka beddeli karaan su'aalaha carruurta iyo qoysaska bulshadooda. Hal waalid/daryeel bixiye ayaa soo jeediyay in la haysto su'aalo dhowr ah oo ay barayaashu dibu eegi karaan inta lagu jiro tababbarka kadibna ay ka doortaan liiskan waraysiyadooda.

### ***Dhisidda tusmayn iyo tusaalooyin cad*.**

Xubnaha la-talinta ee qaaday waraysiyada intii lagu jiray kulanada dhagaysiga waxay xuseen in laba ka mid ah su'aalaha gaar ahaan (3 iyo 4), ay tahay inay siiyaan tusaalooyin iyo tusmayn dheeri ah waalidiinta/daryeelayaasha. Tusaalooyinkan ayaa ka caawiyay waalidiinta/daryeelayaasha inay go'aamiyaan nooca su'aalaha la weydiinayo iyo noocyada jawaabaha waraystaha ay rajaynayeen in qoysasku ay la wadaagaan. Waalidiinta/daryeellayaashu waxay isku raaceen in Su'aasha 4aad ay tahay mid jahawareer gaar ah leh. Qoysaska iyo waraysteyaashu waxay isku raaceen inay waxtar yeelan doonto in dib loo eego erayada su'aalahan, oo la raaciyo tusaalayaal, tusmayn, iyo su'aalo daba-socda habka waraysiga.

### ***Horumarinta tarjumaadda*.**

Dhowr waalid/daryeelayaal ah ayaa xusay in su'aalaha laga soo turjumay Ingiriisiga loona turjumay luqaddooda ay ku jahawareereen. Waxay ku taliyeen in lala shaqeeyo dadka ku hadla afka hooyo si dib loogu noqdo ereyada su'aalahan. Guddiyada la-talinta ayaa soo jeediyay in agabyo dheeri ah (tusaale, duubista muqaal uu qof kor ugu dhawaaqayo su’aaha luqado badan) ay caawin karto qoysaska.

### ***Ku darida su'aalo dheeraad ah*.**

Waraysi qaadayaashu waxay waydiiyeen waalidiinta/daryeelayaasha waxa ay jecel yihiin in la waydiiyo intii lagu jiray waraysiga qoyska. Qoysasku waxay ku taliyeen in lagu daro su'aalo ku saabsan saddex mawduuc: 1) xidhiidhka barayaasha, carruurta, iyo qoysaska, 2) meelaha carruurtu ku wanaagsan tahay iyo baahiyaha, iyo 3) waxbarashada hore iyo barnaamijyada daryeelka oo ay qoysasku ku talinayaan. Guddiga La-talinta ayaa sidoo kale ku taliyay in si toos ah wax looga waydiiyo waxay ku wanaagsan yihiin carruurtu iyo waxa ay xiiseeyaan.

### ***Ku tababbarka barayaasha sida loo sameeyo waraysiyada qoyska*.**

Xubin Guddiga La-talinta ah ayaa si gaar ah ula wadaagtay fikrado badan oo ku saabsan sida loo qaabeeyo agabka tababbarka iyo hababka ka caawin doona barayaasha xadaanada waraysiyada qoyska. Waxay soo jeediyeen in lagu daro tabo iyo tilmaamo loogu talogalay barayaasha sida qoysaska loo dareensiiyo soo dhawayn iyo raaxo, sida loo dareemo waraysiga wada sheekaysiga, iyo sida diirada loogu saaro dhisitaanka xidhiidhka waraysiyada. Waxa kale oo ay ku taliyeen in lagu daro macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan sida xogta iyo macluumaadka la ururiyey inta lagu jiro waraysiyada loo isticmaali doono, ma aha oo kaliya barayaasha xadaanada shakhsi ahaaneed, laakiin sidoo kale dugsiyada, degmooyinka, iyo gobolka (ELD iyo ODE). Waxay soo jeediyeen in lagu taageero barayaasha helitaanka macluumaadka ku saabsan ilaha deegaanka si ay ula wadaagaan qoysaska. Ugu dambayntii, Guddiyada La-talinta waxay soo jeediyeen in tababbarka lagu daro macluumaadka saadka, sida cidda qabanqaabinaysa waraysiyada, waxa la samaynayo haddii waalidka/daryeelaha aanu qof ahaan tegi karin, sida loo taageero qoysaska isticmaalaya su'aalaha waraysiga ee la turjumay, sida loola shaqeeyo turjumaannada, iyo haddii barayaasha loo oggol yahay inay weydiiyaan su'aalo dheeraad ah, oo

ikhtiyaari ah oo ku habboon qoysaskooda iyo dugsigooda.

## Gabagabo

Guud ahaan, inta badan ka qaybgalayaasha Kulamada Dhagaysiga Qoyska ayaa muujiyay mahadnaq ku aaddan su'aalaha la weydiiyay. Qoysaska iyo Guddiyada La-talinta ayaa sheegay in su'aalaha ay ka taageerayaan barayaasha xadaanada si ay ula xiriiraan carruurta iyo waalidiinta/daryeelayaasha, iyo sidoo kale ogeysiinta ELD iyo ODE labadaba. Mid ka mid ah waalidka/daryeelaha ayaa sheegay in bilowgii ay werwersanaayeen, su'aaluhu inta badan way cadaayeen waxayna ka dhigeen inay si qoto dheer uga fikiraan waxa ay u rabaan ilmahooda.

---

Warbixintan waxaa soo saaray Waaxda Waxbarashada Oregon iyo Qaybta Waxbarashada Hore ee Oregon. Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo oregonearlylearning.com/PreKCheckin ama iimayl u dir PreKCheckin@ode.oregon.gov.

# Lifaaqyada

Dukumeentiyada soo socda ayaa la siiyay dadkii samaynayay waraysiga qoyska intii lagu gudajiray kulamada dhagaysiga gu'ga 2022. Qoysasku ma helin macluumaadkan

A. Tilmaamuhu waxa ay siiyeen waraystayaashii xog asal ah oo ku saabsan ujeedada waraysiga qoyska iyo macluumaad la taaban karo oo ku saabsan waxa ay tahay in ay sameeyaan kahor iyo inta lagu jiro waraysiga.
B. Qoraalka muunada ahi waxa uu siiyay waraystayaasha hagis ku saabsan waxa ay u sheegi lahaayeen qoysaska marka ay waraysiyada qaadayaan. Qaybtan waxa kale oo ka mid ahaa su'aalaha waraysiga oo ay la socdaan laba tiir: hal tiir ayaa ahayd halka ay waraystayaashu ku qoreen qoraallo ku saabsan jawaabaha qoysaska. Saddexda su'aalood, tiirkan waxaa ku jiray liis habaysan oo waraysiyada ay isticmaali karaan si ay u codeeyaan ama u kala saaraan waxay qoysasku ku sheegeen jawaabahooda. Tiirka kale waxa uu tusinayaa xidhiidhka ka dhexeeya su'aalaha la waydiiyay iyo qorshaha istiraatijiyadeed ee Oregon ee waxbarashada hore, *Kor Uqaadida Oregon.*

C. Su'aalaha ra'yi-celinta ah waxay siiyeen waraystayaasha xidhmo su'aalo ah oo ay waydiiyaan qoysaska si ay u helaan jawaab celintooda ku saabsan waxa si fiican u shaqeeyay iyo waxa lagu hagaajin karo su'aalaha iyo habka waraysiga qoyska.

# Lifaaqa A: LISTENING SESSION INSTRUCTIONS

Fadlan qaado daqiiqado yar si aad dib ugu eegto qaybahan macluumaadka kahor inta aanad la kulmin daryeelaha.

## Asalkii hore ee Qiimaynta Xadaanada:

ODE iyo ELD waxay hakinta u qaateen fursad ay dib ugu habeeyaan qiimaynta si ay si wanagsan uga uga qabtaan tabashooyinka ay la wadaageen xubnaha bulshadu. Qaar ka mid ah walaacyada waxay ahaayeen habraac laakiin sidoo kale waxay la xiriireen eexda qiimeynta. Waa kuwan qaar ka mid ah kuwa la xusay:

- Jahwareerka ku saabsan ujeeddada Qiimaynta Xadaanada taasoo keenta iibsi aan joogto ahayn oo laga helo maamulayaasha iyo isticmaalayaasha macluumaadka
- Walaaca ku saabsan wakhtiga maamulka ee la xidhiidha kulanka ugu horreeya ee carruurta ee dugsiga
- Walaaca ku saabsan fasiraadda iyo warbixinta Natiijooyinka iyo u faa'iidadooda si ay ugu adeegaan ujeedooyinka qiimeynta
- Walaaca ku saabsan ka jawaab celinta dhaqameed ee qiimeynta, oo ay ku jiraan, laakiin aan ku xaddidnayn, qiimeynta ardayda ku hadasha luqad aan Ingiriisi ahayn iyo halista eexda aan tooska ahayn ee Hababka Waxbarashada
- Walaacyada ku saabsan sida dugsiyadu uga qaybgalaan ardayda iyo qoysaskooda ee ku saabsan ujeedada qiimaynta, tarjumida natiijooyinka ardayga gaarka ah, iyo sida natiijooyinka loo isticmaalo
- Walaaca ku saabsan inaan la qiimayn dhammaan carruurta

## Ujeedada Dibu-qaabaynta:

Dibu-qaabaynta "Qiimaynta Xadaanada" waxay ururin doontaa xog sawir ah oo ku saabsan gobolka oo dhan carruurta iyo qoysaska marka ay bilaabaan xadaanada.
Ujeedada ugu weyn ee xogtan ayaa noqon doonta in lagu wargaliyo go'aamada heer deegaan, gobol, iyo heer gobol ee ku saabsan Waaxda Waxbarashada Hore ee Oregon iyo Qaybta Daryeelkag.
Qaybaha dib loo habeeyay ayaa sidoo kale si macno leh uga taageeri doona qoysaska sidii ay xiriir ula yeelan lahaayeen barayaasha xadaanada iyagoo ku martiqaadi doona inay la wadaagaan waayo-aragnimadooda kahor dugsiga barbaarinta.

## Kahor waraysiga:

Go'aami luqadda aasaasiga ah ee uu ku hadlo daryeeluhu. Haddii luqadda aasaasiga ah aysan ahayn Ingiriisi ama Isbaanish, la xiriir… si aad u codsato adeegga turjumaadda luqadda ee gaarka ah.
Bar naftaada agabka smartsheet. Dibu eeg xulashooyinka dukumeenti fudud.

## Qarsoonaanta:

Waxaannu rabnaa inaan hubinno qoysaska in inta lagu jiro waraysigan, aan ilaalin qarin doono aqoonsigooda. Macluumaadka ay nala wadaagaan waxa uu naga caawin doonaa inaan horumarino su'aalaha ku habboon si aan u waydiino qoysaska inta lagu jiro tijaabada Dayrta 2022.

## Inta lagu jiro waraysiga:

- Sii meel bannaan, u fiirso sida uu dareemayo qofka la wareystay iyo sida uu uga jawaabayo. Isku day inaadan ku qasbin jawaabaha.
- Dhex-dhexaad ka noqo, ka taxaddar inaadan maldahan inay jirto jawaab sax ah.
- Ka digtoonow eexdaada.
- Lasoco haddii loo baahdo
- Ku raaxayso fursadan gaarka ah si aad si fiican u barato ardaydaada iyo qoysaskaaga!

## Uruurinta Macluumaadka:

Waxaa jira saddex siyaabood oo aad u ururin karto macluumaadka:

1. Diiwaangeli dooda oo ku raaxayso inaad waqti ku barato daryeelaha. Qoraal ayaa la qaaadi doonaa intaa kadib.
2. Si toos ah ugu diiwaangeli Smartsheet
3. Isticmaal foom oo aad markaas aad ku shubi karto Smartsheet mar dambe. Fadlan hubi in dhammaan qoraallada la tirtiro kadib marka xogta la geliyo Smartsheet.

# Lifaaqa B: TUSAALAHA QORAALKA KULANKA DHAGAYSIGA

## Hordhac:

Galab wanaagsan (subax, fiidkii). (Haddii ay tahay kulankaagii ugu horreeyay, dhammaystir isbarashada. Haddii aysan ahayn, si kooban u hubi kadibna u gudub dhisidda isfahan.)

## Dhisidda Isfahan:

Waxaan rabaaa inaan daqiiqado yar ku qaadano inaan kaala hadlo wax ku saabsan waayo-aragnimada ilmahaaga kahor intaanay soo gelin xadaanada. Waxaan qaadan doonaa xoogaa qoraal ah inta aan hadlayno. Qoraaladayda waxaa lala wadaagi doonaa Waaxda Waxbarashada Oregon iyo Qaybta Waxbarashada Hore ee Oregon. Jawaabahaaga su'aalahan ugu horeeya waxay ka caawin doonaan gobolkeena inuu isbeddel ku sameeyo waxbarashada hore ee gobolkeena iyo nidaamka daryeelka. Waxaan rajaynaynaa in jawaabahaagu ay ka caawiyaan hay'adaha kala duwan ee gobolka oo dhan inay horumariyaan qoysaska mustaqbalka waxbarashadooda hore iyo waayo-aragnimadooda daryeelka.

Waa inay kaliya qaadataa 10-15 daqiiqo. Haddii ay jiraan su'aalo aadan rabin inaad ka jawaabto, fadlan ii sheeg. Waxaan rabaa in aan kuu xaqiijiyo in magacaaga laguu qarin doono. Macluumaadka aad bixiso ayaa naga caawin doona inaan go'aamino habboonaanta su'aalaha aan weydiineyno iyo habka ugu wanaagsan ee loo ururin karo macluumaadka. Iyada oo ku salaysan ra'yi-celintaada, waxaanu kuu samayn doonaa tafatir ku saabsan su'aalaha tijaabada Dayrta 2022. Kadib marka aan dhammayno su'aalaha, waxaan ku weydiin doonaa ra'yigaaga ku saabsan su'aalaha.

Haddii ilmuhu la joogo waalidka, ku casuun wada-hadalka adiga oo waydiinaya:
Magacaa?
ii sheeg sida aad u dareemayso aadida xadaanada?
Waa maxay wax aad rabto in aan adiga kaa ogaado?

| Su'aalaha Dhismaha Xiriirka | | |
|---|---|---|
| Xiriirinta Kor u Qaadista Oregon | Su'aasha | Jawaabaha suurtagalka ah waxay noqon doonaan kuwa furan |
| RUO: Ujeedada 6 | 1. Maxay tahay rajada iyo riyada ilmahaaga ee sanadkan? | |
| RUO: Ujeedada 6 | 2. Maxaad rabtay inaan ogaado oo aan ka fahmo ilmahaaga? | |

Su'aalahan soo socda, waxaan xiisaynayaa in aan wax ka barto waayo-aragnimada qoyskaaga ee waxbarashada hore iyo daryeelka sannadkii hore. Markaa, waxaan jeclaan lahaa inaad dib uga fikirto

muddadii u dhaxaysay Sebtembar ilaa hadda. “Waxbarashada hore iyo daryeelka” waxaan ula jeedaa nooc kasta oo ah daryeelka ilmaha ama goobaha dugsiga barbaarinta [magaca ilmaha] laga yaabo inuu ku jiray, nooc kasta oo xiisado ah, kooxaha ciyaarta, ama kooxaha taageerada ee adiga ama [magaca ilmaha] aad ka qaybgashay, iyo adeegyo kasta oo kale oo qoyskaagu helay si ay u taageeraan sida [magaca ilmaha] wax u bartay oo uu u koray sannadkii hore.

| Xiriirinta [Raise Up Oregon] | Su'aasha | Jawaabaha suurtagalka ah |
|---|---|---|
| RUO: Ujeeddada 2 | 3. Waa maxay noocyada daryeelka ilmaha ama goobaha dugsiga barbaarinta ama daryeelka maalintii ee qoyskaagu u hayay [magaca ilmaha]?<br><br>Tusaale ahaan, ilmahaaga ma waxa keliya daryeelay adiga ama waalid kale ama masuulka sharciga ah? Haddii qof kale uu si joogto ah u daryeelo ilmahaaga, xaggee ka dhacday daryeelkaas? Ma waxay ku daryeeleen gurigaaga mise guri qof kale? Mise waxaa lagu daryeeli jiray xarun ama dugsi aan ku jirin qof gurigiisa gaarka ah? | Fadlan dooro mid ka mid ah doorashooyinka soo socda ee ka tarjumaya waxa qoysku ku sharraxay jawaabtooda:<br>● Ilmaha waxa daryeelay waalidka ama masuulka sharciga ah<br>● Ilmaha waxa lagu daryeelay gurigooda gaarka ah<br>● Ilmaha waxa lagu daryeelay guriga qof kale<br>● Ilmaha waxa lagu daryeelay xarun ama dugsi<br>● Midkoodna kuwa sare<br>● Wax kale ____________________ |
| RUO: Ujeeddada 2 | 4. Maxay yihiin adeegyada iyo taageerada qoyskaagu u haysteen si ay [magaca ilmaha] uga caawiyaan inuu waxbarto ama koro?<br><br>Waxaan aad u danaynaynaa adeegyo iyo taageerooyin kala duwan. Tusaale ahaan, qoysaska qaar ayaa guri ku soo booqda, ama ka qaybgala xiisadaha waalidnimada, ama haysta IEP, ama haysta macalimiin dugsi-hore oo ku hadla afkooda hooyo, ama isticmaala lacagta cuntada, ama ku jira barnaamijka dugsiga barbaarinta ee ay dawladdu maalgeliso, ama haysta daryeel fiidkii ama sabtida ah. iyo adeegyo iyo taageerooyin kale oo badan. | Fadlan dooro mid ka mid ah xulashooyinka soo socda ee ka tarjumaya waxa qoysku ku sharraxay jawaabtooda:<br>● Booqdaha guriga<br>● Daaweeyaha hadalka<br>● Fasallada waalidka iyo ilmaha<br>● Kooxaha ciyaarta ee ilmahan<br>● Fasalka waalidnimada ama kooxda taageerada waalidka<br>● Adeegyada waxbarashada gaarka ah (waxay lahaayeen IEP ama IFSP)<br>● Baraha hore oo ka tarjumaya jinsiyadda ama dhaqanka qoyska<br>● Baraha hore oo ku hadla luqadda guriga qoyska<br>● Caawinta gaadiidka<br>● SNAP (shaambada cuntada)<br>● TANF<br>● Barnaamijka Waxbarashada Hore uu |

| | | |
|---|---|---|
| | | maalgeliyo gobolku (Barnaamijka Sanduuqa Sinaanta Carruurnimada Hore (ECEF), Daryeelka Maalinta La Xiriira Shaqada (ERDC), Qoysaska Caafimaadka Oregon (HFO), Uurka-ilaa-Xadaanada (OPK) ee Oregon, Ballanqaadka Dugsiga Barbaarinta, Xannaanada Gargaarka)<br>● Saacadaha dhaqameedka ee daryeelka (ie, daryeelka fiidkii ama sabtida)<br>● Midkoodna kuwa sare<br>● Wax kale______________________ |
| RUO: Ujeedada 2 | 5. Adeegyada iyo taageerada aad hadda sheegtay, kee baad odhan lahayd uu ugu qiimo badnaa ilmahaaga iyo qoyskaaga? | |
| RUO: Ujeedada 2 | 6. Ma jiraan adeegyo ama taageerooyin aad jeclaan lahayd in qoyskaagu awood u yeesho inuu isticmaalo si uu [magaca ilmaha] uga caawiyo inuu waxbarto oo uu koro? | Fadlan dooro mid ka mid ah xulashooyinka soo socda ee ka tarjumaya waxa qoysku ku sharraxay jawaabtooda:<br>● Booqdaha guriga<br>● Daaweeyaha hadalka<br>● Fasallada waalidka iyo ilmaha<br>● Kooxaha ciyaarta ee ilmahan<br>● Fasalka waalidnimada ama kooxda taageerada waalidka<br>● Adeegyada waxbarashada gaarka ah (waxay lahaayeen IEP ama IFSP)<br>● Baraha hore oo ka tarjumaya jinsiyadda ama dhaqanka qoyska<br>● Baraha hore oo ku hadla luqadda guriga qoyska<br>● Caawinta gaadiidka<br>● SNAP (shaambada cuntada)<br>● TANF<br>● Barnaamijka Waxbarashada Hore uu maalgeliyo gobolku (Barnaamijka Sanduuqa Sinaanta Carruurnimada Hore (ECEF), Daryeelka Maalinta La Xiriira Shaqada (ERDC), Qoysaska Caafimaadka Oregon (HFO), Uurka-ilaa-Xadaanada (OPK) ee Oregon, Ballanqaadka Dugsiga Barbaarinta, Xannaanada Gargaarka) |

| | | |
|---|---|---|
| | | ● Saacadaha dhaqameedka ee daryeelka (ie, daryeelka fiidkii ama sabtida)<br>● Midkoodna kuwa sare<br>● Wax kale_______________________ |
| RUO: Ujeeddada 6 | 7. Maadaama aynnu bilaabayno sannad-dugsiyeedka cusub, ma iiga sheegi kartaa wax yar taageerooyinka adi iyo ilmahaaga aad u baahan kartaan si aad u dareentaan guulo badan? | |

# Lifaaqa C: WARAYSIGA KADIB, RA’YI-CELINTA TIJAABADA

dhagaysi si aan kaaga maqalno fikradahaaga ku saabsan su'aalahan iyo habkan. Waxaan rabnaa inaan ogaano labadaba waxa si fiican u shaqeeyay, waxaad ka heshay habkan, iyo sidoo kale waxa aan si fiican u shaqayn - asal ahaan wax kasta oo ku dareensiiya raaxo la'aan ama aadan jeclayn ama aanad ka helin ama ka qaaday jahawareer.

| Su'aasha | Jawaabta |
|---|---|
| Ii sheeg sideed u dareentay su'aalaha? | |
| Maxaad si fiican u aragtay su'aalaha iyo habka? | |
| Waa kuwee qaybaha wareerka ahaa? | |
| (Hadii aad aqoon u leedahay waalidka) Iska yeel in ay tahay markii ugu horaysay ee aad ila kulanto, ma uga jawaabi lahayd si la mid ah ama ka duwan? | |
| Maxaad jeclaan lahayd inaan kugu waydiino qayb ka mid ah waraysigan? | |

## Xidhitaanka:

Waad ku mahadsan tahay wakhtigaaga maanta. Waxaan ka mahadcelinayaa rabitaankaaga inaad ila wadaagto fikradahaaga. Waxaan kuugu soo diri doonaa kaadhka hadyada elektarooniga ah iimaylka aad bixisay. Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, ama aad ka fikirto wax kale oo aad jeclaan lahayd inaad nala wadaagto, fadlan xor u noqo inaad igala soo xidhiidho ciwaanka iimaylkan: